

Maaddo: Taariikh.
dugsiga sare.

Fasalka 4aad ee

Qeybta I: Run (R) ama Been (B).

- 1. (R) Cusmaaniyiinta waxa ay soo galeen Aasiyada yar qaybtii ugu dambaysay qarnigii 13aad.**
- 2. (R) Sannadkii 1948dii tirada Yahuudda waxay gaartay 646kun oo u dhiganta 32%.**
- 3. (R) Ruhinga waa dad muslimiin ah ee ku dhex nool dowladda Miyanmaar.**
- 4. (R) Taliyaanigu waxa uu kala wareegay Ingiriiska koonfurta Soomaaliya Abriil, 1950.**
- 5. (R) Qudus waxaa gacanta u gashay Baabiliyiinta oo hoggaaminayey Nabuukhad Nasar sannadkii 586 NCH.**
- 6. (B) Halgankii Cumar Mukhtaar ee kula jiray Taliyaaniga waxa uu bilowday 1912 ka dib markii uu soo degay Bingaazi.**
- 7. (R) Goordan waxa uu soo gaaray Khartuum 18dii Febraayo 1884tii.**
- 8. (R) Intii u dhexeysay 1904- 1905, Ruushka waxa uu galay dagaal ka dhan ah Jabaan iyada oo ujeedkeedu yahay qabsashada dhulal cusub ee Bariga fog.**
- 9. (B) Ballan qaadkii Balfour waxa uu dhacay sannadkii 1945.**
- 10. (R) Kacdoonkii Mahdiga waxaa lagu tiriyaa kacdoonadii ugu caansanaa ee taariikhda dalka Liibiya.**
- 11. (R) Maxkamadda caalamiga ee caddaaladda (ICJ) waxaa la aasaasay 1945.**
- 12. (B) Ururka shirweynaha Islaamka waxa uu ka kooban yahay 22 dal.**
- 13. (B) Bulsho waa mabaadi'da asaasiga ah oo la soo uruuriyay kuwaas oo salka ku haya habeynta awoodaha dowladda iyo caddeynta xuquuqaha dadka ku jira oo dhan.**
- 14. (R) Janaraal Kiliibar waxaa mar kale uu wajahay kacdoonkii 2aad ee Qaahira 20 Maarso 1800.**
- 15. (R) Jamhuuriyada Midowga Koonfur Afrika waxa ay ahayd mid ka mid ah tusaalooyinka ugu foosha xun dunida ee ku dhisan midab kala sooc.**

7. Magacii hore ee loo yaqiinay Istanbul waa:-

b. Anaatoliya. t. **Konistantanoobal.** j. Ankara.

8. Hitler waxa uu qabsay Austriya bishii Maarso.

b. **1938.** t. 1939. j. 1940.

9. Mareykan waxa uu hubka Nukliyeerka ku tuuray magaalooyinka Hiroshiima iyo Nagasaaki ee dalka Jabban sannadkii.

b. **1945.** t. 1944. j. 1943.

10. Dagaalkii qaboobaa waxa uu bilowday ka dib.

b. Dagaalkii 1aad ee Adduunka. t. **Dagaalkii 2aad ee Adduunka.**

j. Dagaalkii Carabta iyo Israa'iil.

11. Gaana waxa ay xuroowday sannadkii.

b. **1957.** t. 1958. j. 1959.

12. Ururka waddamada Jaamacadda Carabta waxaa la aasaasay sannadkii.

b. 1944. t. **1945.** j. 1946.

13. Dagaalkii 1aad ee Adduunka waxa uu socday.

b. 2 sano. t. 3 sano. j. 4 **sano.**

14. Dowladda Cusmaaniyiinta waxa ay dhisneyd.

b. 5 qarni. t. **6 qarni.** j. 7 qarni.

15. Soomaaliya waxa ay ku biirtay Urur Waddamada Jaamacadda Carabta sannadkii.

b. **1974.** t. 1975. j. 1976.

16. Manroofiya waa magaalo ku taallo.

b. **Liberia.** t. Congo. j. Nigeria.

17. Qadiyadda Ruhinga waxa ay bilaabmaysaa sannadkii .

b. **1784** t. 1874 j. 1994.

18. Dowladda Miyanmaar waxa ka go, day maamulkii Ingiriiska ee Hindiya sannadkii:-

b. **1937.** t. 1945. j. 1948.

19. Nabi Ibraahiim (NNKH) waxa uu yimid dhulka Falastiin sannadkii.

b. 1700 NCH

t. 1990 NCH

j. **1900 NCH.**

20. Dowladda Israa'iil waxa lagu dhawaaqay .

b. **14 May 1948.**
14 May 1946.

t. 14 May 1947.

j.

Qeybta III: Buuxi meelaha bannaan.

1. Bedka dhulka Falastiin waa **27 kun km square.**
2. **DIMOQRAADDIYAD** waxaa loo jeedaa xukun dad ama xukun inta badan.
3. Xisbigii ANC waxaa la aasaasay 8dii Jannaayo sannadkii **1912.**
4. Suldaankii saddexaad ee dowladda Cusmaaniyiinta waa **Muraad 1aad.**
5. Cumar Mukhtar waxa uu dhashay sannadkii **1862 dii.**
6. Koonfurta Soomaliya waxaa ka talinayay maamulkii ciidanka Ingiriiska laga soo bilaabo sannadkii **1941.**
7. Ururka Shirweynaha Islaamka waxa uu ka kooban yahay **57** dal.
8. **BUSHO** waxaa lagu qeexaa in ay yihiin koox dad ah oo ku wada nool dhul gaar ah si ay ugu wada xiriiraan dhexdooda
9. **MASJID AL-AQSA** waa qibladii ugu horreysay ee Muslimiinta.
10. Kancaaniyiinta ayaa ahaa dadkii ugu horreeyay ee degay dhulka Falastiin intii u dhexeysay **3000-2500 NCH.**

Qeybta IV: ka jawaab su, aalaha soo socda. 20 dhibcood.

1. Qeex waxa loola jeedo Xisbi siyaasadeed.

J: Xisbi siyaasadeed waa koox dad ah oo isku raacay aragti siyaasadeed, rabana in ay talada qabsadaan si ay awoodda oo dhan ugu fushadaan ujeeddo ay rabaan in ay gaaraan.

2. Sheeg xaqiijinta ujeedooyinka sharciga.

J: Sharcigu waxaa loo arkaa inuu yahay aaladda abaabusha nolosha siyaasadda, maadaama uu sharcigu dejinayo xiriirka ka dhexeeya mas, uuliyiinta dowladda.

3. Sheeg Astaamaha ka qeybgalka siyaasadda.

J: Astaamaha ka qeybgalka siyaasadda waxa ka mid ah: Waxqabad, Tabarucid iyo Xulasho.

4. Qeex Dastuur adag.

J: Dastuur adag waa mid ay adag tahay in wax laga beddelo marka laga reebo habraacyo adag sida in uu u baahan yahay oggolaanshaha saddex meelood laba meel baarlamaanka dhexdiisa iyo in dadka afti laga qaado wax ka beddelka loo baahan yahay.

5. Sheeg shan ka mid ah waddama lagu aasaasay Ururka Shirweynaha Islaamka.

J: Waddamada aasaasay shirweynaha Islaamka waxaa ka mid ahaa: Afgaanistaan, Bakistaan, Indoniisiya, Kuweyt iyo Masar.

6. Sheeg goorta ay burburtay dowladdii Cusmaaniyiinta.

J: Dowladda Cusmaaniyiinta waxay burburtay sannadkii 1923.

7. Sheeg muhiinadda Kashmiir ay u leedahay Bakistaan.

J: Muhiimadda Kashmiir ay leedahay Bakistaan waxaa ka mid ah:

1. Waa meesha ay ka soo baxaan saddex wabi oo halbowle u ah nolosha bakistaan.

2. Waa il laga helo dad saldhig difaac u ah waqooyiga Bakistaan.

3. Waxa ay xoog dadeed oo muslimiin ah u tahay gobolka Bunjaab.

8. Sheeg qaab dhismeedka Ururka Shirweynaha Islaamka.

J: Qaam dhismeed Ururka Shirweynaha Islaamka waa:

Golaha Sare, Golaha Wasiiradda Arrimaha Dibadda iyo Xoghaynta Guud.

9. Yaa soo jeediyay fikradda lagu aasaasay Jaamacadda Carabta?

J: Fikradda lagu aasaasay Jaamacadda Carabta waxaa soo jeediyay Jamaal Al-Diin Al-Afghani.

10. Sheeg goorta la aasaasay Qaramada midooway.

J: Qaramada midooway waxaa la aasaasay sannadkii 1945 tii.

Prepared by: Teacher Faysal Abdihakin Abdi Asis(Sama Jeceyl).